



Sidee Xafiiska Xallinta Cabashada Booliska ii caawin karaa?

Waxaan ku siin karnaa xogo, caawimaad, iyo talo.

Waxaan:

- xaqijinaynaa in aad heshid dhammaan xogaha aad u baahan tahay si aad u soo gudbisid cabashada.
- kugu hageynaa dariiqa habka cabashada.
- kuu sharxaynaa xuquuqdaada.
- xaqijinaynaa in cabashadaada wax looga qabto si caddaalad ah, dhedhexaad ah, oo xushmad leh.

Ma jiraan adeegyo taageero oo la helo?

Ururada bulshada ee kala duwan ayaa kaa caawin kara habka cabashada. Si aad ula xiriirtid kan ugu habboon baahiyahaaga, fadlan naga soo wac telefoonka **1-877-999-8707** (telefoon lacag la'aan ah). Weydiiso Iskuduweheena Wacyigalinta iyo Helitaanka.

Adeegyada tarjumaadda iyo ka af-celinta ayaa la helaa.

Liiska dhammaan hay'adaha taageerada wuxuu ku jiraa bartaan
www.opcc.bc.ca

Waa kuwee waaxyadaa booliska ee aan daboolno?

Waxaan la soconaa cabashooyinka hay'adahaan iyo waaxyadaan booliska:

Abbotsford	BC Combined Forces Special Enforcement Unit - Organized Crime Agency
Central Saanich	Metro Vancouver Transit Police
Delta	St'latl'imx Tribal Police
Nelson	Vancouver
New Westminster	Port Moody
Oak Bay	Saanich
Surrey	Victoria
West Vancouver	

Kama hawlgalno cabashooyinka ciidanka booliska federaalka ee RCMP. Si aad u gudbisid cabasho ku saabsan ciidanka booliska federaalka ee RCMP, booqo bartaan www.crcc-ccetp.gc.ca.



Naga La Soo Xiriir

Telefoonka: (250) 356-7458
Faksiga: (250) 356-6503
Telefoon Lacag La'aan ah wac:
1-877-999-8707
limeylka: info@opcc.bc.ca



Goobta Shaqada

2nd floor, 947 Fort Street
Victoria, British Columbia




Cinwaanka Boostada

PO Box 9895, Stn Prov Govt
Victoria, BC V8W 9T8

Wixii xogo dheeraad ah booqo
barteena internetka ah

www.opcc.bc.ca



Ma waxaad cabasho ka qabtaa booliska Biritish Kolombiya?

**Hufnaan
Madaxbannaani
Caddaalad**

OPCC
OFFICE OF THE
POLICE COMPLAINT
COMMISSIONER



Maxaan cabasho ka gudbin karaa?

Sidee cabasho u gudbiyaa?

Waxaad cabasho u gudbin kartaa:

- khadka internetka adiga oo maraya barta internetka ee Xafiiska Xallinta Cabashada Booliiska (www.opcc.bc.ca).
- adiga oo u geynaya xoghaynta hore ee waaxda booliiska degmada.
- adiga oo naga soo wacaya telefoonka **1-877-999-8707** (telefoon lacag la'aan ah).
- qof ahaan, adiga oo soo booqanaya xafiiskeena ku yaal **947 Fort Street**.



Maxaa dhacaya marka aan cabasho gudbiyo ka dib?

Haddii cabashadaada la ogolaado, waxaa loo diri doonaa baaritaan oo shaqaalaheena ayaa la socon doona baaritaankaas si loo xaqijiyo in uu yahay mid dhammaystiran oo caddaalad ah. Adiga waxaa lagu soo siin doona wixii soo kordha hadba meesha baaritaanku maraayo.

Waa maxay anshax-xumada booliiska?

Waa dhaqamada, erayada, ama falalka aan la qaadan karin ama habboonayn oo uu sameeyo sarkaal booliis ah.

Saraakiisha booliiska waxaa laga filayaa in ay:

- muujiyaan daacadnimo, hufnaan, caddaalad, iyo dhexdhedaadnimo.
- ula dhaqmaan xubnaha dadweynaha si xushmo leh.
- aysan ku xadgudbin xooggooda iyo awooddooda sharci.
- u dhaqmaan si dadweynu uu kalsooni ugu sii qabo.

Booliiska waxaa la siiyey awoodo badan oo aysan haysan waddaniyiinta kale. Xafiiska Xallinta Cabashada Booliiska wuxuu xaqijiyyaa in tabashooyinka ku saabsan anshax-xumada booliiska wax looga qabto sida ugu habboon oo booliiska lagu la xisaabtamo marka ay ku kacaan anshax-xumo.

Waxaad cabasho ka gudbin kartaa noocyada anshax-xumada booliiska ee soo socda:

- Ku xadgudub awoodda sharciga
- Gacansiin fal anshax-xumo booliis
- Dhaqan musuqmaasuq
- Waxyeelayn hantida booliiska
- Waxyeelayn hantida dad kale
- Khayaanada
- Ixtiraam darro
- Dhaqan falfalxumo
- Shaacin xogo oo aan habboonayn
- Dhaqan xumo shaqada ka baxsan
- Iisticmaal ama daryeel hub oo aan habboonayn
- Si xun loo isticmaalo maandooriyaal
- Dayicid waajib shaqo

Waxaad kale oo cabasho ka gudbin kartaa adeegyada ama siyaasadaha waaxda booliiska.

Wac **1-877-999-8707** telefoon lacag la'aan ah ama booqo www.opcc.bc.ca